Region Värmland
Smittskydd Värmland

Tiibisho, warbixin bukaan (2016-05-03)

Qoraalka dhakhaatiirta ka gaashaamashada cudurada faafa

Maxaa warbixintan laguu siinayaa
Waxaad qabtaa ama lagaaga shakisanyahay in aad qabtid cudur tiibisho, waxaadna u baahantahay daweyn. Warqaddani waxaa ay ka koobantahay warbixin ku aaddan tiibishada, sida cudurka loo daweeyo iyo waxa aad u baahantihid in aad sameysid.

Tiibisho maxay tahay?
Tiibisho (laguna magacaabo sidoo kale TBC ama TB) waa cudur infekshin ah oo ay bakteeriyo keento, *Mycobacterium tuberculosis*. Badanaa waxaa ay keentaa caabuq sambabo laakiin xitaa qeybaha kale ee jirka ka mid ah, sida tusaale ahaan qanjirrada limfaha, galka sambabaha, lafaha, maskaxda ama kilyaha, wey ku dhici kartaa. Calaamadaha cudurku waxaa ay badanaa soo baxaan waqti dheer (bilo ama sanooyin) qaadsiinta ka dib. Xagga carruurta yar-yar ama dadka difaacooda jirku liito si degdeg ah ayuu cudurku horumar ugu sameyn karaa, wuxuuna noqon kara mid aad u khatar ah.

Sidee tiibisho qofka ugu dhacdaa?
Cudurka waxaa la iska qaadsiiyaa xagga dadka tiibishada ka qaba sambabaha ama neef mareennada. Bakteeriyada waxaa lagu faafin karaa hawada guriga gudihiisa marka la qufaco oo qof kale uu dhibcaha yar-yar ee bakteeriyada leh neef ahaan u jiito. Tiibisho waxaa wax walba ka hor leysku qaadsiiyaa marka uu jiro xiriir dhaw oo waqti dheer socda. Sidaas darteed ayey badanaa dadka isku guri deggan u nugul yihiin qaadsiinta. Waalidku wuu qaadsiin karaa carruurtiisa, xitaa saaxiibbada dha-dhaw waa la qaadsiin karaa. Caadi ahaan wey yartahay in qof la qaadsiiyo mar u xiriir waqti gaaban ah dhacay ama kulamo ku meel gaar ah, tusaale ahaan goobta shaqada ama dugsiga.

Sidee lagu dareemaa in qofka ay hayso tiibisho?
Dhibaato caadi ah waa miisaanka oo dhaca, qufac daba dheeraada, dhidid waqtiga habeenkii ah iyo feebaro. Dhibaatadu waxaa ay ku xirantahay meesha ay jirka bakteeriyada tiibishadu uga jirto. Tiibisho ku jirta neef mareenka waxaa ay badanaa sababtaa qufac waqti dheer ku haya. Dhibaatooyin kale waxaa ay noqon karaan barar (tiibisho ku jirta qanjirrada) ama xanuun (tiibisho ku jirta lafaha ama caloosha). Calaamadaha tiibishadu waa ay kala duwanaan karaan hadba kala duwanaashada dadka ee ku aaddan inta uu qofku xanuunsanaa – laga bilaabo ku dhawaad waxba iyo si aad u khatar ah.

Ilaa intee tiibishada lays qaadsiin ogyahay?
Dadka qaba tiibishada sambabaha, taas oo bakteeriyo laga heli karo baaritaanka qufaca, waxaa ay noqon kartaa mid aad laysu qaadsiiyo inta aan daweynta la billaabin. Qaadsiin kariddu waa ay yaraaneysaa horbaba usbuucyada ugu horreeya ee daweynta. Dadka ay tiibishadu ka hayso meel ka baxsan sambabaha ama neefmareenka maaha kuwo qaadsiin badan. Carruurta yar-yar ee qaba tiibishada qiyaastii marnaba wax ma qaadsiiyaan. Tiibisho leyskuma qaadsiiyo xagga dharka ama alaabta kale. Cudurka sidoo kale bannaanka leyskuma qaadsiiyo.

Tiibishadu ma khatarbaa?
Haddii aan tiibishada la daweyn bakteeriyadu wey faafi kartaa iyadoo weerar ku qaadeysa xubnaha kale. Tiibisho aan la daweyn waxaa ay keeni kartaa dhaawacyo khatar ah, mararka qaarna waxaa ay noqon kartaa mid nolosha khatar gelisa. Carruurta yar-yar iyo dadka difaacooda jirku liito waxaa ay si aad ah khatar ugu jiraan in tiibishada aad ugu xanuunsadaan. Dadka tiibishada ka qaba neefmareenku waxaa ay qaadsiin karaan dadka kale.

Sidee loo reysiiyaa tiibishada?
Tiibishada waxaa lagu daweeyaa dawo dileysa bakteeriyada cudurka keeneysa. Daweyntu waxay qaadaneysaa waqti dheer oo waxaa ay soconeysaa bilooyin fara badan. Aadbey muhiim u tahay in la raaco daweynta uu dhakhtarku bixinayo. Dawooyinka qaarkood waxaa la

qaadanayaa inta calooshu ay faaruqa tahay (badanaa hal saac quraacda ka hor). Sidoo kale waa muhiim in aan laga baaqsan wax kaniini ah in la qaato inta daweynta lagu jiro. Raac talooyinka dhakhtarkaaga. Xil iska saaris la'aan ku aaddan daweyntu waxaa ay keeni kartaa in bakteeriyadu ay noqoto mid si xoog leh dawada iskaga celisa, markaasna adkeysa daweynta. Dawada tiibishadu waa lacag la'aan iyo weliba booqashooyinka la socodka xaaladda.

Raad raaca qaadsiintu – maxaa ay ka dhigantahay?
Waa muhiin in la helo dadka qaba tiibishada si ay daweyn u helaan, mid ahaan si loo yareeyo khatarta waxyeellooyinka (eeg xagga sare), mid ahaanna si infekshinku uusan ku faafin dad fara badan. Sidaas darteed adigaaga qaba tiibishadu waa in aad sheegtaa kuwa aad si dhaw ula nooleed markii ay kugu dhacaysay, kuwaas oo ay dhici karto in aad qaadsiisay, ama in ay ku qaadsiiyeen. Qofka waa dhici kartaa in la qaadsiiyo laakiin khasab maaha in uu xanuusado.

Tiibishadu waxaa ay ku jirtaa shuruucda ka gaashaamashada is qaadsiinta – maxaa ay taasi ka dhigantahay?
Marka aad qabtid tiibishu waa in aad u noolaato si aadan khatar ku ahayn in aad qof kale qaadsiiso.

Adigaaga qaba, ama lagaaga shakisanyahay in aad qabtid tiibisho, **waa in aad raacdaa xeerarka xiriirka ee aad ka heleysid** dhakhtarkaaga:

- Adigaaga, qaba tiibisho ah mid lays qaadsiin karo,
  - waxaa laguugu qasbi karaa in isbitaal laguugu daweeyo
  - aadan aadin shaqo, dugsi ama hawlaha xilliga firaaqada la qabto ilaa daweyntu ay kaa dhigto mid aan wax qaadsiin karin dhakhtarkaaguna uu sheego in aadan sii qaadsiin karin dadka kale.
- Waa khasab in aad booqasho dib ugu soo laabatid haddii dhakhtarkaagu uu dhaho waa in taas aad sameysid.
- Haddii aad guureysid waa in aad dhakhtarkaaga ku wargelisaa taas.

Haddii lagu siiyay hab xiriir oo aad u aragtid qalad, waxaad xiriir la sameyn kartaa dhakhtarka ka gaashamashada cudurrada lays qaadsiiyo ee maamul gobaleedkaaga.

Ma dooneysaa in aad in badan sii ogaatid?
Macluumaad badan oo ku aaddan tiibishada waxaa laga helaa
www.1177.se
www.folkhalsomyndigheten.se

Macluumaadka xiriirka *(Kontaktuppgifter)*

Magaca rugta qaabilaadda *(Namn på mottagningen)*

.....

Cidda la kulantay *(Du har träffat)*

..... Dhakhtar *(Läkare)*

..... Kalkaaliso caafimaad *(Sjuksköterska)*

Nambarka telefoonka/waqtiga taleefanka rugta qaabilaadda *(Telefonnummer/telefontid till mottagningen)*

.....